



---

## **HOST GUIDEBOOK**

---

[Xogta Shirka Miiska Ballaaran](#)

[Isu-diyaarinta wada shekeysiga](#)

[Wada Shekeysigeena](#)

[Wada Sheekeysiga waxa xiga](#)

[Talooyinka Baraha Bulshada](#)

---

### **Join Us!**

Sign up as a host for The Big Table at  
<https://cbusfdn.org/BigTableHost2019>

---

### **QUESTIONS?**

Contact us at  
[bigtable@columbusfoundation.org](mailto:bigtable@columbusfoundation.org)

---

Conversations that connect and  
inspire.

1234 East Broad Street  
Columbus, Ohio 43205-1453

Phone: 614/251-4000  
Fax: 614/251-4009

[columbusfoundation.org/  
thebigtable](http://columbusfoundation.org/thebigtable)

# THE BIG TABLE®

THE COLUMBUS FOUNDATION  
8.28.19

## Join Us!

Sign up as a host for The Big Table at  
<https://cbusfdn.org/BigTableHost2019>

## QUESTIONS?

Contact us at  
[bigtable@columbusfoundation.org](mailto:bigtable@columbusfoundation.org)

Conversations that connect and  
inspire.

1234 East Broad Street  
Columbus, Ohio 43205-1453

Phone: 614/251-4000  
Fax: 614/251-4009

[columbusfoundation.org/  
thebigtable](http://columbusfoundation.org/thebigtable)

## Xogta Shirka Miiska Ballaaran

### WAA MAXAY ?

Ururka “ Columbus Foundation” wuxuu dadweynaha ku nool bartamaha Ohio ku martiqaadayaa xiriirinta iyo dhirigelinta qofba qofka kale isagoo kala sheekeysanaya mustaqbalka “Columbus” taasoo siinayso bulshada awood xoogan. Doodan furan iyo fikiradeeda waxay abuuri doontaa xiriir iyo qaab cusub oo wada shaqayneed , is-fahamka qofba qof kale oo qotodheer iyo waxay bulshadu u baahan tahay.

### GOORMA?

Bisha Agoosto 28, 2019, dadweynaha ku nool bartamaha Ohio waxay ka soo qaybgalidoonaa wada sheekeysiga maalintaas oo idil ah. Wada sheekeysigaas waxay dhacayaan xilliyada Quraacda, Qadada iyo Cashada iyo xilli kasta iyo markasta oo kooxuhu isku imanii ama kulmi karaan si ay u wadaagaan fikradahooda oo ay u abuuraan mustaqbal ifayo.

### QOFKEE?

Boqolaal martigeliyaal ah oo casuumaya kumanaan kale oo marti ah oo midba kan kale daryeelaya islamarkaana daneenayo mustaqbalka bulshadeenna ayaa u kulmaya kooxo yar yar dhammaan bartamaha Ohio. Wada sheekeysigaas waxaa ka qaybgalaya 8-12 qof. Ka qaybgalayaasha wada sheekeysigan waxaa lagu dhiirigelinayaa isticmaalka Baraha Bulshada si ay ula wadaagaan fikirkooda iyo waayo aragnimadooda.

### HALKEE?

Martigaliye kasta wuxuu dooranayaan goobta ay kooxdu ku kulmayso si ay u yeeshaan wada sheekeysiga, una wadaagaan cabitaan. Waxaa goobahaas ay noqon karaan Guryaha, Makhaayadaha, Xarumaha bulshada, Maktabadaha, Xafiisyada, iyo Goobaha lagu cibaadaysto, iyo meelo kale intaba. Cuntada iyo cabitaanka fudud waxay ahaan karaan cunto fudud ama casho Culus – wax walba ay koox ay kuwada raaxaysan karto ama ka wada heli karaan.


### MAXAA YEELAY?

“Columbus” waa magaalo soo kobcayso. Waxaan danaynaa oo diyaar u nahay inaan waqti siino si aan isku dhageysano oo midba kan kale wax ka barto. Markaynu isku nimaadno waynu is xoojinayno midba kan kale si aan u hogaamiyno bulshadeenna una dhisno mustaqbal wacan.

### MAS’UULIYADA MARTI-QAADAH

#### Marti-Qaadaha, waxaa lagaa filayaa:

- In aad ku soo martiqaadid 8-12 qof wada sheekeysiga dhacaya bisha Agoosto 28, 2019.
- Aad hesho goob ku habboon wada sheekeysiga
- Aad siiso cunno iyo cabitaan ka kooban cunno fudud ilaa cunno culus si ay martidaada ay ugu raaxaystaan waqtiga lagu jiro wada sheekeysiga.
- U adeeg si aad u hagto wada sheekeysiga martida una qaadaan “Snapshot Poll Online”-Codaynta khadka tooska ah.
- Ku dhiirigeli martidaada inay ka jawaabaan sahanka (survey) kooban kadib wad sheekeysiga.



## Isu-diyaarinta wada shekeysiga

### Tilmaamaha kaa saacidaya martigelinta wada sheekeysiga miiska ballaran

Bartamaha Ohio wey sii kobcaysaa, maxaa yeelay waan daryeelaa oo waa danaynaa. Waxaan siinaa waqtigeena si uu qofba qofka kale wax uu ka barto. Wada sheekeysigan la isku imanayo miiska ballaaran ayaa ah

#### QABAN QAABADA KULANKA MIISKA BALLARAN

Waad ku mahadsan tahay in aad qayb muhiim ah ka tahay kulanka Miiska Ballaran ee bisha Agoosto 28. kulanka Miiska Ballaran waa dadaal bulshadeed, waxaana kaaga mahad celinaynaa iskaashigaaga ka martigeliye ahaan.

Bisha Agoosto 28, kumanaan dad ah oo ka kala socda dadyoow asalkoodu iyo deegaanadooda kala duwan iyo kooxo gaar ah ayaa ku soo xirmaya wada sheekeysiga, kana hadlidoono mustaqbalka Bartamaha Ohio.

Kulankan Miiska Ballaran, waa maalin loo aasaasay bulshada oo loogu talagaly in lagu xoojiyo fahamka xilligan adag. Muhiimada ma aha helidda xuluull deg-deg ah, balse waa habkii loo aburi lahaa isku xirnaanta bulshada rayadka ah iyadoo loo marayo wada sheekeysiga. Adiguna waxaad tahay xoojiyaha wada sheekeysiga horay u riixaya.

Haddiii aan la heleen martiqaade, ma hirgeleen dadaalkan bulshadeed

#### MAXAA LOOLA JEEDAA IN LA NOGDO MARTIQAAD?

Ka martiqaada ahaan, waxaad isku xilsaartay isku keendidooda si ay u lafaguraan arrimaha muhiimka u ah bulshadeena oo aad la wadaagto aragtiyo gaar ah iyo fikrado cusub.

Martigeliyayaasha ayaa rumaysan in awoodooda shakhsiyadeed ay saameyn ku yeelan karto dhisida bulshada.

Wada sheekeysigan wuxuu dhici karaa waqti kasta ee maalinta iyo goob kasta oo ay martidaada ka dareemi karaan raaxo iyo jawi wacan. Cabitaanka (Refreshments) wuxuu ka koobnaan karaa cunto fudud iyo mid culus.

Waxa looga gol-leeyahay ama la doonayaa, waa in la helaa jawi ama goob uu ka dhaco wada sheekeys dhab ah.

#### MACLUUMAADKA FADHIGA

Waxaa dhicidooda labo fadhi oo wargelin ah oo ka dhacaya xarunta " **The Columbus Foundation's Davis Hall (1234 E. Broad Street, Columbus, OH 43205)**. inkastoo imaashuhu uusan ahayn qasab, waxaadse fursad u helidooda inaad la kulanto martiqaadayaasha kale ee kulanka Miiska Ballaran, oo aad weydiiso su'aalo ku saabsan sidaad u hogaamin lahayd wada sheekeysiga, iyo inaad dhegeysatid khibradooda.

Tan hore waxay dhici doontaa **Arbacada, July 24**, laga bilaabo **Duhur-1: 00 pm**. RSVP inay ka soo qeyb gasho kulankaan oo ah: <https://cbusfdn.org/BigTableinfo1>.

Tan labaad waxay dhici doontaa maalinta **Isniinta, Agoosto 12** laga bilaabo **6:00 pm-7:00 pm**. RSVP inay ka soo qeyb gasho kulankaan oo ah <https://cbusfdn.org/BigTableinfo2>.

Alaabada sheekaysiga miiskaaga weyn waxa laga soo qaadan karaa 'Columbus Foundation' laga bilaabo July 24.

## MARTIQAADKA MARTIDAADA

Wada Sheekeysiga Miiska ballaran wuxuu ku saabsan yahay in qof walba la siiyo fursad uu inta kale wax kula wadaago lana dhageysto. Tirada ugu fiican ee wadahalada kastaa waa 8-12 qof. Kooxaha ka badan 12 qof waxaad dhici doonta inay u kala jabaan kooxo yar yar, iyadoo u qaybinaya hal wada sheekeysiga oo baaxad weyn, wada sheekeysiga dhowr ah oo kala jaad jaad ah.

Haddii aad ogtahay wax ka badan 12 qof oo jeclaan lahaa inay ka qeybqaataan wada sheekeysiga, kaliya weydii saaxiibkaa ama asxaabtaada inay kula qaybsadaan marti gelinta wada sheekeysiga. Wada sheekeysigan ayaa ka dhici kara isla goobtii, kaliya hubi inaad haysatid meel kale oo ay qayb galayaashu u kala qaybsami karaan kooxo ah 8-12 . Haddii ay jiraan dhowr miisadood oo isla hal goob ah, fadlan hubi in miis kastaa leeyahay koox gaar u ah.

Markaad marti qaadid martidaada, waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad la timaaddid isku-dhafka wanaagsan ee waayo-aragnimada iyo himilooyinka kala duwan. Ka fikir inaad ku martiqaaddo dadka qaarkii oo aadan waqti badan ku lumineynin arrimaha bulshada. U adeegso arrintan sida fursad aad ku fidiso shabakadaada oo waxqabadkaaga caadiga ah. Xaqiiqdii, waxaad tixgelin kartaa inaad casuuntid dadka aadan aqoon gabi ahaanba. Weydii qaar ka mid ah asxaabtaada ama saaxiibsaada inay la keenaan kuwo kale oo aadan weli la kulmin, ama waxaad martiqaadaa dad ka socda goobaha kala ah maqqayada qaxwaha, iskuulka ilmahaaga, gurigaaga cibaadada, ama xarunta bulshadaada.

Halkan waxaa ah tusaale waraaqda martiqaadka oo loo dirayo martidaada. Fadlan xor baad u tahay inaad u ku dirtid emayl ama warqad loogu talagalay martidaada imaneysa, ama aad sameysato mid gaar ah adigu. Martida waa lagu casuumi karaa si kasta oo kuu fudud.

Salaan xx,

Agoosto 28, waxaan ku soo biirayaa dadaalka bulshada ee loo yaqaan 'The Big Table'. Maalintaan, kooxo dad ah oo matalaya asalo kala duwan, xaafado, iyo kooxo danaynaya, ayaa ka qeyb gali doona boqolaal wada sheekeygi oo looga gol leeyahay sida aan u abuuri karno isku xirnaan xoogan .

Waxaan marti gelinayaa mid ka mid ah wada hadaladaas, waxaana jeclaan lahaa inaan kugu martiqaado inaad igu soo biirto aniga iyo kooxda si aan isku dhegeysano oo uu qof waliba qofka kale wax ka barto.

Goobta:

Waqtiga:


Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wada sheekeysiga Miiska Ballaran (Big Table), fadlan booqo: [columbusfoundation.org/thetable](http://columbusfoundation.org/thetable).

Fadlan RSVP aniga haddii aad jeceshahay inaad ka soo qeybgasho madashaan xiisaha badan iyo wada hadalka muhiimka ah.

Waxaan rajeynayaa inaan kula kulmi doono Agoosto 28 si aan uga wada hadalno miiska Wada Sheekeysiga!

Haddaad jeceshahay inaad macluumaad dheeri ah la wadaagtid martidaada, weydii iyaga inay booqdaan bogga Weyn ee Websaydhka ee [columbusfoundation.org/thetable](http://columbusfoundation.org/thetable)

Nagala soo xiriir [bigtable@columbusfoundation.org](mailto:bigtable@columbusfoundation.org) ama 614 / 251-4000.



## Wada Sheekeysigeena

Waxaan rajeyneynaa in Miiska Ballaran uu dhaliyo wada sheekeysiga caadi ah oo ku saabsan mustaqbalka “Columbus iyo Bartamaha Ohio”. Wada sheekeysigan ayaa horumarin doona sida xubnaha miiska wadaaga codkooda, una horseedi doona xiriir qoto dheer, is- faham iyo hawl gelinta bulshada.

Abuuritaanka bulsho xoog leh, waxay ka timaadaa doora ay ka qaataan shaqsiyaadka, qoysaska, ganacsiyada, iyo, dowlada iyo ururada gargaarka.

Dhammaan fikradaha waa la soo dhaweynayaa, dhammaan codadka waa la maqlayaa islamarkaana dammaan dadka waxaa loo arkaa kuwa qiimo badan.

Waxaa ugu fiican haddii mowduucu lagu dhiso codadka ay kooxdu wadaageyso. Hadafku waa wada sheekeysiga furan oo caadi ah, taas oo macnaheedu yahay in mowduucyo badan laga wada doodi karo.

Ma jiro hal hab oo lagu bilaabo wada sheekeysiga. Sanadkan, waxaan ka codsaneynaa ka qeyb galayaasha “Big Table” in ay ka buuxiyaan shabkada internet-ka wax loo yaqaano (Online Snapshot Poll) si tooska ah miiskooda. Su’aalaha ku saabsan mustaqbalka “Columbus iyo Bartamaha Ohio” waxay noqon karaan kuwa keena dadjinta wada sheekeysiga. **Fadlan martidaadu ha raacaan tilmaamaha hoosta ku qoran oo ha ka qeyb qaataan wax loo yaqaano (Snapshot Poll) ka hor intaadan bilaabin Wada sheekeysiga.**



### iPhone:

- Kaameerahaaga kor mari QR Code-ka
- Guji ogeysiisyada ku soo dhacaya korka shaashaddaada.
- Ka jawaab su’aalaha sahanka.

### Android:

- Xulashada 1: Isticmaal barnaamijka kumbuyuutarka iskaanka ee QR
- Xulashada 2: Cinwaanka bogga ku qor biraawsarkaaga
- Kajawaab su’aalaha sahanka


## TALLOOYIN WAX KU OOL AH EE WADA SHEEKEYSIGA

### SAMEE

- Ku marti munaasabadda meel raaxo leh, kuna martigaad goob martidaada oo dhan ay dareemi karaan soo dhaweyn.
- Adiga isbar martidaada, qof waliba sidaa oo kale ha sameeyo
- Iska fogee ama dami taleefoonka gacanta si qof walbaa u san ugu mashquulin
- Ku soo dhawee martida si ay u faafaahiyaan fikradooda
- Samee qoraal oo ku dhiirigeli martida inay sidaas oo kale sameeyaan.
- Dhiirrigelinta wada shekeysi hal abuur iyo wax soo saar leh, halkii aad diiradda saari lahayd wax aan waxaba ka soo baxeeynin.
- Wada sheekeysiga kadib, la wadaadg fikradahaaga, sawiradaada, iyo mowduucyada dhinaca baraha bulshada adoo adeegsanaya #The BigTable.
- Ku dhiirigeli qof walba inuu ka qeyb qaato wada hadalka, dhageysiga, iyo aqoon isweydaarsiga midba midka kale .
- Ururi oo is weydaarsada macluumaadka xiriirka ee kooxdaada si mustaqbalka ay u wada xiriirtaan.

### HA SAMEEYNIN

- In aad weydiisato in kooxdaadu diiradda saarto mowduuc aad horay u dooratay.
- in aad qof firadiisa ama faaladiisa aad tixgelin weeydo.
- Ha wal wal in; Wada shekeysigu waa inuu noqdaa caadi, raaxo iyo madadaalo
- Ha xakabeynin wada sheekeysiga, si caadi ah ha u socodo
- Ha ka cabsoonin in aad su'aalo weydiiso
- Iska ilaali bunbuuninta cabashooyinka, muranka, ama doodaha aan waxtar lahayn; waxaa qiimo badan in diirada la saaro wixii wax wanaajinaya, halkii aan ka daadihin lahayn sheyga qaldan.
- Ha Joojin la wadaaga marka sheekaysigu dhammaado; sii wada in qof walib ka doodaan fikradaheena



## Wada Sheekeysiga waxa xiga

Isu imaatinka weligiiba muhiimad weyn ma yeesho. Waxaan rajeyneynaa wada sheekeysiga miiska weyn inuu qaab casri ah isku xirayo adiga, martidaada, iyo bulsho weynta. Dhageysiga iyo aqoon isweeydaarsiga waa tallaabada koowaad ee ugu muhimsan abuuritaanka bulsho adag oo isku xiran.

### ISKU XIRIRI LIISKA MARTIDA

Gudbi liiska martida ee lagu siiyay kulankii wada sheekeysiga si aad ula wadaagtid macluumaadka saaxiibbadaadii hore iyo kuwa cusub ee Miiska Ballaran (Big Table). Kadibna, fadlan ku soo celi liiska martida dhanka hayadda “The Columbus Foundation” si aan u helno jawaab celin, isla markaana uga wargelino ka soo qaybgalyaasha dhacdada soo socota ee miiska ballaran ee “Big Table” .

### LA WADAAG RAYI’CELINTA

Martigeliye ahaan, waxaan qiimeyneynaa ra’yi-celintaada ku saabsan wada sheekeysiga Miiska Ballaaran (The Big Table). Fadlan wax qor inta lagu gudajiro wada sheekeysiga , kadibna fikradaada la wadaag. Marka uu wada sheekeysiga Miiska Weyn uu dhammaado, waxaad heli doontaa sahanka (survey) ”Columbus Foundation” si lagaaga caawiyo diyaarinta ra’yi-celintaada. Fadlan ku dadaal sidii aad uga jawaab celin lahayd sahanan waqti ku habboon. Xor baad u tahay inaad la wadaagto macluumaad dheeri ah oo aan codsigu sahaminta ku jirin, kuna soo hagaaji email-ka ah [bigtable@columbusfoundation.org](mailto:bigtable@columbusfoundation.org).

Ka hor inta ayan kala tagin martidaada, xusuusi in ay kaa heli doonaan xiriiriye (link) sahanka, kuna adkee oo ku dhiirgali inay ka jawaabaan oo ay soo gudbiyaan ra’yi-celintaada..


### KALA WARHAYN

Waxaan rajeyneynaa in kulanka Miiska Weyn uu yahay bilowga wada sheekeysiga xiiso leh, iyo in adiga iyo martidaada ay dhiirgeliyaan sii wadidda dhageysiga iyo aqoon kala kororsika qofba qofka kale si aad u abuurto awood u hogaamisa beesheena mustaqbal wanaagsan. Fadlan xusuusnow in aad ugu mahadceliso martidaada ka qeybgalka Miiska Ballaran “The BigTable”. Ka qayb galkooda wada sheekeysiga Miiska Ballaran (Big table), waxay u tahay hadiyad weyn bulshadeena. Waxaan rajeyneynaa inaad la xiriirto martidaada oo aad sii waddo wada sheekeysiga, adoo qorsheynaya shirar dheeri ah ama aad la hadashaan dadka kale ee laga yaabo inay xiiseynayaan fikradaha kooxdaadu ay wadaagaan. Maanta waa maalin diirada lagu saaray dhisida bulshada, hasa ahaatee, Miiska Ballaran (Big table) wuxuu had iyo jeer u furan tahay wada sheekeysiga.

### KU SAABSAN URURKA COLUMBUS FOUNDATION

Columbus Foundation waxay u adeegtaa ku dhawaad 3,000 oo shakhsi, qoysas, iyo ganacsiyo abuuray maalgelin nooc gaar ah iyo deeqo loo qorsheeyay inay isbedel ku sameeyaan nololsha dadka kale iyada oo loo marayo habka tabarucaada ee suurto galka ah.

Mu’asasada “Columbus Foundation” waa Lataliyahaaga Tabarucaada, kana mid ah 10ka ugu waaweyn mu’asadaha bulshadeed ee dalka Mareykanka. Booqo [columbusfoundation.org](http://columbusfoundation.org) si aad wax badan uga sii ogaato.



## Talooyinka Baraha Bulshada Tilmaamaha kaa caawinaya inaad martigeliso Wada Shekeysiga Miiskaaga Weyn

Bartamaha Ohio waa gobol horumar tiigsanaaya , maxaa yeelay waan daryeelnaa. Waqti ayaan siineynaa si aan is dhageysano oo aqoonta isweydaarsano qofba qofka kale. Markii aan sidaas yeelno, waan isu soo dhowaaneynaa qofba qofka kale, waxaan u abuuri karnaa awood u horseeda beesheena mustaqbal wanaagsan.

### OHIO'DA DHEXE (CENTRAL OHIO) OO GUUXI DOONTA AGOOSTA 28 - IYO SIDII AY BARAHAAGA BULSHADA ULA QABSAN LAHAAYEEN.


Waxaa caadi ah in Baraha Bulshadu ay leeyihiin waqti iyo goob laga galo. Waxaan rajeyneynaa Wada Shekeysiga inuu ahaado mid shaqsiyadeed, islamarkaana noqdo mid isdhaxgal u noqda adiga iyo martidaada ee shaashada aan ka muuqanin inta badan ee dooda ay socoto. Hasa ahaatee, waxaan had iyo jeer kugu dhiirigelinaynaa inaad la wadaagto waayo-aragnimada iyo madadaalada ee “Big Table” ka hor ama ka dib wadashekeysiga!



#### FIKRADAHA BARAHA BULSHADA!


- U dir sawir lagu qoslo oo kooxeed martidaada isku timid miiskaaga. #Table Selfie, qofkasta?
- Sawir la qaado saaxiib cusub oo aad calaameysid!
- So dhaji, oraah culus oo xambaarsan dhabalka Wada Shekeysiga.
- Wada Shekeysigu miyuu ku dhacayaa meel gaar ah? Sawir ka soo qaado.
- La wadaag inta kale, nuxurka murtida laga soo qaadan karo Wada Shekeysiga.
- Qof waliba kan kale ha ku xirmo bartiisa bulshada. Waa saaxiibo cusub!
- Hubso inaad ku danted #TheBigTable dhammaan qoraaladaada ku dhajineyso Barahaaga Bulshada!

#### KU XIRO “COLUMBUS FOUNDATION” EE BARAHA BULSHADA:

 **Facebook:** facebook.com/TheColumbus Foundation

 **Twitter:** @colsfoundation

 **Instagram:** @colsfoundation

 **LinkedIn:** linkedin.com/company/the-columbus-foundation

**Hashtag:** #TheBigTable